

RAMADAANTA:

Mahadi waxay u sugnaatay Eebe(subxaanahuu watacaalaa), Rabi baanan gargaar iyo denbi dhaaf waydiisanayeynaa, waxaan ka magangalaynaa sharka nafteena iyo camaladeena xun, ka uu Eebe hanuuniyo cid luminaysaa ma jirto, kase uu lumiyo cid hanuuninaysaa ma jirto, waxaan qirayaa inaanu jirin Ilaah xaq lagu caabudo ilaahay mooyaane, Muxamedna(amaanta iyo nabadgelyada eebe korkiisa ha ahaatee) inuu yahay rasuulkiisii iyo adoonkiisii.

Intaa ka dib,

Xikmada Eebe waxay keensatay inay noqoto aduunyadu meel beer u ah aakhiro, qofkuna waxa uu ku beerto uu aakhiro goosanayo.

Fadliga Eebe waxaa ka mid ah inuu ku abaalmariyo inta yar in badan ajarkana uu laalaabo, waqtiyadana waxaa ugu weyn uguna barako badan bisha Ramadaan, ee uu Rabi soo dejiyey gudaheeda Quraanka sharafta badan, sidaa darted waxa mudan in qofka muslimka ahi uu u diyaargarooobo bishani barakaysan, fahmana shuruudaheeda, sunankeeda iyo adaabta loo guto cibaadada bishan barakaysan gudaheeda.

Walaalkayga muslimka ahow bal qalbigaaga kusoo xaadiri qofka loogu kalgacayl badanyahay agtaada, kaana maqnaa muddo 11 bilood ah, laguuna sheegay inuu soo socdo..... intee inleeg baad ku farxi lahayd imaanshihiisa.....

Hadaba muumiintu soo gelida Ramadaan aad bay ugu farxaan, Eebahoodna ugu mahadnaqaan inuu ku simay gaadhida Ramadaan{badanaa walaalaheen inala soomay Ramadaantii hore, hase ahaate Eebahood oofsaday ka hor ramadaantan}, waxayna muumiintu go'aan ku gaadhaan inay korodhsadaan xasanaadka kana fogaadaan xumaanta, kuwaasina waa kuwa uu Eebe ugu bishaaraynayo hadalkiisan "waxaad tidhaahdaa suubanow galada Eebe iyo naxariistiisa, taas ha ku farxeen, ayadaa uga kheyir badan waxay uruurinayaane" YUUNUS(58).

Muumiintu waxay maqleen hadalka Rasuulka (scw), camal kasta oo binu aadamku sameeyo waa loo laalaabaa, xasanada toban la mid ah ilaa todoba boqol ayaa la laalaabaa, Eebe wuxuu yidhi soomka mooyaane, maxaa yeeley aniga ayaa iska leh, kana abaalmarinaya, qofku wuxuu ka tegay dareenkiisii iyo cuntadiisii aniga dartay" muslim.

Sahal ibnu Sacad (rc) wuxuu ka soo weriyey Nebiga (scw) inuu yidhi "janada waxaa ku yaala albaab la yidhaa: **Rayaan**, waxaana ka gala keliya dadka sooman maalinta qiyaame, kamana galayo ayaga cid aan ahayn, markay ka galaana waa la xidhaa, cid kalena ka soo galimayso, marka uu galo ka u danbeeya albaabka ayaa la xidhaa, kii galana waa la waraabinayaa, kii la waraabiyaana waligii haraadi mayo".

SIDEE AYUU UGA HORTAGAYAA KHEyr DOONUHU RAMADAANTA

- 1- Inuu u degdego toobada suuban ee dhabta ah, dhamaystirana shuruudaheeda.
- 2- Inuu barto waxyaabaha lagama maarmaanka u ah soomka
- 3- Inuu goosto inuu Ramadaanta daacada Eebe badiyo
- 4- Inuu ogaado inay Ramadaantu siduu Eebe(sw) ku tilmaamay tahay maalmo tirsan, degdega ku dhamaanaysa, mashaqada soo gaadha qofka Ramadaanta gudaheeduna ay tahay mid tagaysa, waxa soo hadhayaan uu yahay keliya qof walba wuxuu shaqaystay ee uu dhigta bangiga xasanaadka.
- 5- Inuu ku dedaalo xifdiga adkaarta ka soo aroortay nebiga (scw).

Bahda Mareegta Farshaxan

- 6- Inuu badsado camalka wanaagsan
 - b- Quraan akhrinta
 - t- Qiyaamu leylka
 - j- Sadaqada, mid salafka ka mid ahaa wuxuu yidhi “ inaan u yeedho tobada saaxiibaday ka mid ah oo aan quudiyo baa looga jaceyl badan yahay agtayda inaan xoreeyo toban adoon. Qaar badan oo salafka ka mid ahina waxay u doorbidi jireen afurkooda dadka kale sida Ibn Cumar(rc), Daa'uud a-daa'ii, Maalik ibnu Diinaar, Axmed ibnu Xanbal eebe ha u naxariisto dhamaane. Ibnu Cumarna wuxuu ahaa mid aan afurin kaligii , waxaa la afuri jiray masaakiinta iyo agoonta.
Hadaba walaalkayga iyo walaashayda muslimada ahey waxaa inala gudboon inaan ku dadaalno inaynaan keligeen afurin, ee ay inala afuraan walaalaheen si aan u helno laba ajar, ka soonka iyo ka afurinta walaalkaaga muslimka ahba Nebiguna (scw) wuxuu yidhi ka afuriya mid sooman waxaa u sugnaaday ajrigiisa oo kale ayadoo midkoodna aan laga nuqsaaminay ajriga soomkooda. Abu Daa'uud , nasaa'i (sanad xasan ah). Sidoo kale waxaa ku sugnaatay xadiiskii saxaabigii qaaliga ahaa Zayd ibn Khalid al-juhayni inuu Nebigu (scw) yidhi ka quudiya mid sooman waxaa loo qoraa ajrigiisa oo kale ayadoo aan la nuqsaaminayn ka soomana ajrigiisa” Imam Axmed, Tirmidhi waanu saxiixayey, Ibnu Xibaan iyo qayrkoodba.
- 7- Ku negaanshaha masaajidka bacda salaada subax , wuxuu ahaa Nebigeenu(scw) mid fadhiya meesha uu ku tukado ilaa qoraxdu ka soo baxayso, ka dibna wuxuu tukan jiray laba rakcadood oo u dhigma xaj iyo cumro dhamaystiran, dhamaystiran , dhamaystiran, siduu yidhi nebigu(scw).
- 8- Ictikaafka ama ku sugnaanshaha masaajidka
- 9- Cumro soo gudashada bisha gudaheeda taasi oo uu ku tilmaamay Rasuulku(scw) mid u dhiganta xaj lala xajiyey asaga.
- 10- Inuu badiyo sunayaasha salaadaha faralka ah gadaashooda
- 11- Inuu ku dadaalo inuu salaada la tukado jamaacada masaajidka.

Haddii aan ka gudubno hordhacaasi , Eebe wuxuu inooga warmayey inuu inagu waajib yeelay soomka siduu ugu waajib yeelay kuwii inaga horeeyey, umadanina ma aha ta keliya ee soomka lagu waajibyeelay, waxa kale oo Eebe (sw) inooga waramay in soomku soo jiido alle ka cabsi, insaankuna uu iskaga ilaaliyo soomka dareenka naftiisa, wuxuu yidhi Eebe: “ kuwa Eebe iyo rasuulkiisaba rumeeyow waxaa lagu waajib yeelay soomka korkiina sidii loogu waajib yeelay kuwii idinka horeeyeyba, mudnaantiina inaad eebe ka baqataaan” BAQARAH(183).

Soomku waa maalmo tirsan, bilowgiina soomku wuxuu ahaa sunne , kii doonaana waa soomi jiray, kii kalena waa iska afuri jiray, Eebe wuxuu yidhi “ maalmo tirsan weeyi soomku ka safar ku jira ama buka waxaa korkooda ahaaday inay soomaan maalmo kale, kuwa uu dhibayo soomkuna waxaa korkooda ah inay waxbixiyaan (hal miskiin maalintiiba), qofka korodhsada wanaaga, khayrka uu korodhsaday baa u fiican, inaad soomtaan ayaa idiin fiicnaan badan , haddii aad tihiin kuwa garanaya”BAQARAH(184).

Ka dib markaa ayuu Rabi(sw) waajib yeelay soomka sanadii labaad ee hijriyada, soomkana waxaa laga dhigay bisha ramadaan, bishan barakaysan ee Eebe uu soo dejiyey Quraankiisa(asagoo hanuun dadka u ah), waxaanu Eebe (sw) galadiisa iyo karamkiisa u yeelay rukhso, kii bukay ama safarka ku jiray inuu afuro, fududayn Eebe uu u fududeeyey ayaga inay wax cunaan, dibna ka gudaan soomkii ka tegay si ay ajriga iyo abaalmarinta Eebe u helaan wuxuu yidhi Eebe (sw)”ramadaan bishiisa baad soomaysaan, bishan la dejiyey gudaheeda quraanka, kaasi oo hanuun u ah dadka aayado cadcad weeyi quraanku kana mid ah hanuun iyo aayado kala bixiya runta iyo beenta , ka jooga ee idinka mid ah bisha ha soomo , kase buka ama safar ku jira waxa korkooda ahaaday maalmo kale inuu soomo, Eebe wuxuu la rabaa idinka adoomada ah fudayd, idinlama rabo idinka culays , waxa kale oo Alle doonayaa inaad dhamaystirtaan bisha tiradeedii iyo inaad weynaysaa kii uu idinku hanuuniyey, mudnaantiina inaad Eebe u mahadnaqdaan”BAQARAH(185).

Waxyaabaha dhaca habeenka ugu horeeya ee ramadaan waxa ka mid ah waxyaabaha ku sugan xadiiskan qaaliga ah ee uu werinayo saxaabigan jaliilka ah Abu hurayra (Cabdiraxmaan ibnu Sakhar) wuxuu yidhi: wuxuu yidhi suubanuhu(scw): “ marka uu ahaado habeenka ugu horeeya ee Ramadaan waxaa la katiinadeeya shayaadiinta iyo kuwa madaxa adag ee jinka, waxaana la xidhaa albaabada naarta lama furo albaab ka mid ah, waxaana la furaa albaabada janada lama xidho albaab ka mid ah, mid dhawaaqa baan dhawaaqa asagoo odhanayo: ka khayrka doonayow soo qaabil, ka sharka doonayowna ka gaabso, allahna wuxuu leeyahay habeenkasta kuwo uu naarta ka xoreeyo, arinkaasina(yacnii xoraynta) waa mid habeenkasta jirta” Tirmidi, Ibu Maajah, Ibnu Khuzayma iyo Bayhaqi..

Toosinta umadiisa meelahan oo kale waxay ka mid ahayd mid uu ku dadaalo waxaanu xasuusin jiray dadka barakada ay leedahay bishan weyni, waxaanu ku yidhi(scw) asxaabtiisa(rc) habeenkii ugu horeeyey ee ramadaan: “ waxaa idiin timiday bishii ramadaan, bishii barakaysnayd, Eebana(sw) uu ku waajibka yeelay korkiina soomkeeda, waxaana la furaa gudaheeda samada, albaabada naarta jaxiimana waa la owdaa, waxaana la xidhaa kuwa madaxa adage e shayaadiinta, Eebana(sw) waxa uu ku leeyahay bishan gudaheeda habeen ka kheyr badan kun bilood, ka laga xaaraantinimeeyo khayrkeeda kaasi dhabnimo baa looga xaaraantinimeeyey(yacnii khayr)” Nasaa’i iyo Bayhaqi, Albaanina waxa u uyidhi waa xadiis xasan ah.

Soomku sharci ahaan waxa weeyi inuu qofku ka afhaysto (af xidho) cunida, cabida, galmada iyo waxyaabaha soomka buriya dhamaantood laga bilaabo cadceeda soo bixitaankeeda ilaa laga gaadhayo dhicideeda, carabkiisana ka ilaaliyo hadalka xun , xanta iyo iskudirka, dhagihiiisana heesaha iyo waxa xun, aragiisana fiirinta xumaanta, gacmihiiisana ku taabashada waxa xaaraanta ah sida salaamida dumarka ama inay haweenaydu raga salaanto, cagihiiisa u socosha meelaha xunxun.

Soomka xukunkiisa:

waa waajib quraanka , sunada iyo ijmaaca muslimiinta baana daliil u ah, qofkuna inuu afuro bisha ramadaan gudaheeda waxay ka mid tahay danbiyada waaweyn, waxaa ka asaxay Abii Umaamata Albaahiliyi(rc) inuu yidhi waxaan ka maqlay nebiga(scw) oo dhahaya “ aniga oo hurda ayaa waxa ii yimiday laba nin, waxayna qabteen cududayda waxay I geeyeen buur aan la fuuli Karin, waxayna igu yidhaahdeen:fuul waxaan ku idhi: ma fuuli karo , waxay igu yidhaahdeen: anagaa kuu fududayneyna, markaasaan koray, ka dib markaan koray baa waxaan maqlay qaylo aad u daran waxaan weydiiyey: waa ayo dadka qaylinayaa? Waxay iigu jawaabeen waa ahlu naarkii, waan sii soconay ilaa aan u tagnay dad soo deldelan, daamankooduna dilaacsanyihiin, dhiigna ka socdo daamankooda, waxaan idhi: kuwani waa ayo? Waxay igu

Bahda Mareegta Farshaxan

yidhaahdeen waa kuwii afuri jiray waqtiga afurka ka hor.” Hadaba haddii kii afurka ku degdegayey uu yahay ciqaabtiisu midan aadka u daran , kii aan soomina waa ka sii ciqaab darnaanayaa.

SIDEE LAGU GARANAYAA SOO GELIDA BISHA!

- 1- bisha in la arko dhamaadka Shacbaan (wax tixgelin ahna malaha xisaabaadka calendars lagu qoraa)
- 2- bisha Shacbaan inay dhamaystiranto(30) xaalada bisha la arki kari waayo.
[in la soomo maalinta laga shakisan yahay bishii inay dhalatay iyo inkale waa xaraam waxaana daliil u ah xadiiskii Camaar ibnu Yaasir(rc) ee uu lahaa Nebigaa yidhi(scw) qofka sooma maalinta dadku ay ka shakisanyihiin inuu soom yahay iyo inkale waxa uu caasiyey Abal Qaasim(yacnii Nebiga(scw)].
Bishu markay ay dhalato waxaa ka asaxday Nebiga (swc) inuu odhanjiray

Taasi oo macnaheedu tahay ilaahay baa weyn, Ilaahayow noogu dhali bisha amni iyo imaan, nabagelyo iyo islaam, nana waafaji waxaad jeceshay kana raalida tahay, bilyahay rabigaa iyo rabigay waa ilaahay...

Wadamada muslimiinta ahi maxay samaynayaa haddii bisha laga arko wadan ka mid ah dhulka islaamka? Sida fiicnayd waxay ahayd in dadka muslimka ahi ay mar wada soomaan oo aanay is khilaafin, selaakiin haddii ay u kala qaybasantay umaddii islaamka ahayd wadamo, aanuna jirin khaliifah ka wada dhaxaysaa , qowlka raajixa ah ee culimadu ku tageen waxaa weeyi inuu soomku waajib ku yahay meesha laga arkay bisha cida ku nool oo kaliya, sidaana waxaa ku tagay xabrul umah ibnu cabaas, sheikhul islaam ibnu taymiyah, calaamatu ibnu cuthaymiin, almuxadithul Albaani korkooda daruuro naxariiseed ha ahaatee.

SHURUUDAHA LOOGA BAAHAN YAHAY CIDDA ARAGTA BISHA

Bisha Ramadaan waxay ku sugnaataa aragti qof caadil ah rag iyo dumar kuu doonaba ha ahaadee, loomana shardiyo inay yihiin laba, waxaa ku filan qof keliya waxaana daliil u ah xadiiska ibnu cumar (rc) ee uu lahaa dadkii baa isku dayey aragtida bisha anigaana arkay ka dib Nebiga(scw) baan u sheegay inaan arkay waanu soomay Nebigu(scw), waxaanu Nebigu(swc) dadka faray inay soomaan” waxaa weriyey Abuu Daaud,Ibnu Xibaan, Xaakim waxaanu yidhi xadiisku waa saxiix calaa shardi Muslim.

Shuruudaha laga rabo qofka bisha arka waa sidan soo socota:

- 1- Waa inuu caadil yahay (mid guta waajibaadka Eebe saaray, denbiyada waaweyn aan samayn, danbiyada yaryarna aan ku madax adaygin).
- 2- Aragiisu inuu aad u fiican yahay, waanay banaantahay in bisha lagu eego laguna arko Telescope iwm.

QOFKA SOOMKU WAAJIBKA KU YAHAY SHURUUDAHA LAGA RABO

- 1- Islaamnimo (gaal soom waajib kuma ah, kamana asaxayo , aakhirana waa lagu ciqaabayaa ka tegida uu ka tegay soomka iyo cibaadooyinka kaleba)
- 2- Qaan gaadhid, waxay u kala qaybsamaysaa laba

Bahda Mareegta Farshaxan

Labka: waa inuu gaadha 15jir, ama timaha hoose u soo baxaan ama uu soo tuuro manida si dareen leh.

Dhediga: saddexdaa aan hore u soo sheegnay iyo dhiiga caadada.

Ka yar waalidku waxaa fiican inay amraan soomka haddii aanu ku dhibtoonayn , siday saxaabadu samayn jirtay waxay Rubayic Binti Mucawid tidhi waxa uu nebigu u diray qof maalintii caashuuraa xaafadaha ansaarta ee duleedka magaalada madiina ku yaalay : ka maanta waabariistay asagoo sooman ha dhamaystiro soomkiisa, kase waabariistay asagoo afuran ha dhamaystiro maalinta inta u hadhan, waxaananu ahayn intaa ka dib kuwa sooma , soomiyana kuwa yaryar ee naga midka ah, geeyana masaajidka, waxaananu u samayn jirnay wax lagu ciyaaro oo suuf ka samaysan, haddii uu ooyo mid kamid ahina cunto asagoo u baahan , bahashaa lagu ciyaarayo baanu u dhiibi jirnay ilaa laga gaadhayo afurka” Bukhaari iyo Muslim. Haddaba waxaa lagudboon waalidiinta inay ubadkooda ku barbaarinayaa sida ay saxaabadu ubadkooda diinta ugu barbarin jirtay, waayo ilmaha yari wax lagu barbaariyo uun buu ku waynaadaa. dhibka jirtaana waxay tahay in waalidkii ay ilmahoodii naxariis ay u tudhayaan ay yidhaahdaan asagoo kari karaya inuu soomo waa ilmo yare iska dhaaf, salaadiina sidaasi oo kale ka dib ilmihii markuu kusoo koro noloshaasi fish and chips ka ahna hadhow ilmihii la canaanayo lana dhaleecayno marka uu iska dhayalsado salaadii, soomkii iyo waxyaabihii Eebo loogu dhawaanayey,waxaana waalidka korkooda ahaaday inay ubadkooda u noqdaan tusaale fiican ramadaanta iyo waqtiga intiisa kaleba ayna ku dadaalaan daacada eebe una qoondeeyaan ubadkooda waqti maalinkasta si ay u fahansiyaan diintooda iyo dariiqa toosan waalidkaasi baana loo rajaynayaa in ubadka uu soo saaro ay diintan kor u qaadi doonaan ,sharafna u noqon doonaan lagu amaano dadka dhexdooda ,amaa hooyada iyo aabaha ilmihiiisii ,beerkiisa, kii loogu jaceylka badnaa agtiisa ka doortay musalsal iyo waxbaas kaasi hadhow haddaanu Eebe naxariistiisa la soo gaadhin waxa u qaniini doonaa suul murugo, waxaana Eebe hortiiisa maalinta aan cidna looga turjumayn rabigiis la weydiin doonaa nimcadii aan kuugu deeqay,adoomadayda qaarkoodna aan ka qadiyey,maxaad iigu abaal guday,qofkastaana wuxuu Rabi la hortagi doono, imika ha sii diyaarsado inta ay goori goortahay,Eebana waxaan ka beryeynaa inuu waalidka kutoosiyo dariiqa toosan kana dhigo kuwa soo saar fac midho dhaliya (AMIIN YAA RABI) .

على ما كان عوده أبوه

وينشأ ناشئ الفتيان منا

3-Garashada (caqliga), qofkase miyirka la' asaga soom kuma uu waajibin, kamana asaxayo haddii uu soomo.

4-Karida (awood), qofkii ka tabardareeyey soomku ku waajibi maayo, cajziguna wuxuu u qabsamaa laba:

a-mid oo kedis ah: sida xanuun aanay suurtoagal u ahayn qofka inuu soomo

b-mid joogto ah:sida qofka da'da weyn ama xanuun joogto ahi hayo.

5- Negaanshaha, qofka safarka kujira soomku waajib kuma aha laba jid baana u banaan inuu soomo haddii aanu ku dhibtoonayn waayo waxay ahaayeen saxaabadii rasuulku iyo nebiguba kuwa sooma marka ay safarka ku jiraan, ka soomani ma aanu dhaleecayn jirin ka afuran sidoo kale ka afurani ma aanu ceebaynjiray ka sooman , haddiise uu ku dhibtoonayo waxaa waajib ku ah korkiisa inaanu soomin .

WAXYAABAHA SOOMKA RIDA

Waxyaabaha soomka rida waxa ka mid ah

b- Haweenayda uurka leh ama ilma yar naasnuujinaysa waxaa u banaan inay cunto haddii ay u baqato ilmaha iyo nafteedaba ama midkood, waxaana waajib ku ah inay markale soomto.

t- Caadada iyo Dhiiga dhalmada labaduba waxay manciyaan soomka iyo salaada.

j- Odayga weyn ee da'da ah ama haweenayda da'da ah Ibnu Cabaasna (rc) wuxuu yidhi "odayga weyn iyo haweenayda weyn haddii aanay karayn soomka waxay quudinayaan maalin kasta qof" Bukhaari.

x- Qofka safarka ah iyo

kh- Qofka buka

NIYADA

Niyadu waa waajib (qalbigaana laga niyeysanayaa),loomana baahna qofku inuu yidhaahdo nawaytu iyo wax la mid ah, waxaana ku filan qofka inuu niyeysto niyo kaliya bisha oo dhan ahna bisha bilowgeeda sidaana waxaa ku tegay sh.abuu cabdilaahi ibn cuthaymiin , cabdallah ibn muxamed al-andalusi almaaliki sida nuuniyadiisa uu sheegay loo yaqaano nuuniyatul qaxdaani iyo culimo kaleba, culimo kalena waxay ku tageen inay waajib ku tahay inuu qofku habeen kasta niyeysto , si kastaba ha ahaatee qofka muslimka aha waxaa u fiican inuu ku dhaqmo xadiiskii Nebiga(scw) ee lahaa " ka tag waxa ku shaki galiya una gudub waxaan ku shaki galinayn" markaa waxaa qofka u wanaagsan inuu niyada habeen kasta iska xidho.

WAXYAABAHA SOOMKA FASAHAADIYA

Ogow adoonyahow Eebe uu abuurtay inuu caabudo, inuu yahay qofka soomani ka ay ka soomaan xubnihiisu danbiyada, carabkiisuna beenta, afxumada iyo hadalka xun , calooshiisuna ay ka soomto cunida iyo cabida , xubintiisa taranku ay ka soomto galmada , hadduu hadlana aan ku hadlin hadal wax u dhimaya soomkiisa, hadduu ficilsameeyana aan samayn ficil wax u dhimaya soomkiisa, kaasi baana ahaaday soomka Eebe inoo jideeyey mana aha soomku kaliya inuu qofku cuntada , cabida iyo dareenkiisa uu nafka ka xidho ka gadaalna uu wuxuu rabo iska sameeyo sida isku dirida, xanta, afxumada iyo wixii la halmaala, Nebiguna(scw) wuxuu ku tirtirsiiyey adoonka muslimka ah inuu ku sifoobo akhlaaqda teeda sareysa fiicana kana fogaado teeda hoosaysa iyo hadalxumada , arimaha xunxun ayadoo uu yahay qofka muslimka ahi mid marwalba la amray inuu ka fogaado haddana ramadaanta gudaheeda waa ka sii xunyihiin in la sameeyo.

Waa kuwan waxyaabahaasi ay lagama maarmaanka u tahay qofka muslimka ah inuu ka fogaado bisha gudaheeda.

- 1- Cunida
- 2- Cabida
- 3- Mani iska keenida(rag iyo dumarba)
- 4- Inuu qofku afuro cadceed dhaca ka hor
- 5- Galmo samayn maalinta gudaheeda, kafaaro gudkeeduna waxa weeyi haddii qofka muslimka ah uu ku dhaco danbigan foosha xun inuu xoreeyo qof adoon ah, hadaanu helin inuu soomo laba bilood oo isku xiga(haddii asaga oo soo soomay 59 cisho uu maalinta lixdanaad afuro waxaa waajib ku ah inuu dib ka soo bilaabo), haddii aanu helin waxaa korkiisa ahaaday inuu quudiyo 60 miskiin, haddii uu dhinto qofkii kafaarada lagu lahaa intaanu iska gudin waxaa

Bahda Mareegta Farshaxan

ka soomaya qaraabadiisa sidaana waxaa ku soo aroortay nusuusta caamka ah sida Ibnu Cabaas(rc) xadiiska uu Nebiga(scw) uu ka werinayo inuu yidhi “ nin baa u yimiday Nebiga(scw) markaasuu ku yidhi Rasuulkii(scw) Eebow hooyaday baa dhimatay, waxaana lagu lahaa korkeeda soom, ma ka gudaah? Wuxuu Nebigu (scw) ku yidhi: haa, daynta Eebe baa u xaqbadan in la gudee” sidaana waxaa ku tegay Imaan Ibnu Xazmi iyo qaar shaaficiyada ka mid ah. Selaakiin xadiiskan iyo axaadiista la midka ahiba waa caam wax laga soo reebayo sida ku soo aroortay nusuusta kale, Abu Daa;uudna wuxuu yidhi waxaan maqlay Imaam Axmed Ibu Xanbal oo leh lagama soomayo ka dhintay ilaa soom uu ku nadro mooyaane ka bacdi markaasaan weydiyey xitaa ramadanta miyaa? Cuntaa laga bixinayaan baanu ku jawaabay, sidanina waa sida la isu waafajinayo axaadiista waayo Ibnu Cabaas oo ah ka soo weriyey xadiiskan aan kor ku soo xusnay kama aanu fahmin xadiisku in soom kastaa soo galo bale wuxuu yidhi haddii qof uu xanuusado bisha ramadaan gudaheeda ha dib uu dhinto asagoon soomin, waxa laga bixinayaa cunto, qalena korkiisa ma aanu ahaan , haddiise uuyahay mid oo lagu lahaa soom nadir ah waxaa ka soomaya qaraabadiisa. Abuu Daa’uud baa weriyey (saxiix) , sidaa si lamid ahna waxa laga soo weriyey hooyadeen Caaishah(rc). Waxaana ka dhalanaya galmada maalinta ramadaan loo sameeyo cudurdaar la’aan b- inuu fasahaado soomku , t- inuu afhaysto maalinta inta ka hadhsan, j- danbi , x- kafaaro gud inuu bixi sidaan kor ku soo sheegnay.

- 6- Iska matajinta si u kas ah ha yaraado matagu hase badnaadee, haddiise uu matagu qofka ka xoog roonaado asagoon u qasdiyin soomku waa asxayaa waana iska sii wadanayaa.
- 7- Cabitaanka sigaarka
- 8- Irbada qofka u kordhisa awooda ee cunto ahaanta loo qaato sida sayloonka oo kale.

WAXYAABAHA AAN SOOMKA FASAHAADIN

Adoonka raacay diinta Eebe (sw), fahmayna kitaabka Rabi iyo sunnada Nebigiisa (scw) waxa uu ogaanayaa inuu Eebe la rabo adoomadiisa waxa fudud aanuna la rabin waxa culus. Rabi wuxuu u baneeyey ka sooman arimo badan Waxyaabahaasina waxaa ka mid ah

- 1- indha khuusha
- 2- toobniinka
- 3- irbadaha loo isticmaalo daawo ahaanta, labaanay u qabsamaan a- mid aan cunto ahaan loo isticmaalin ee daawonimo loo qaato taasi jabin mayso soomka b-mid cunto ahaan loo qaato sidaan kor ku xusnay taasina way jabinaysaa soomka.
- 4- Haddii uu odaygu xaaskiisa la ciyaaro (dhunkashoo kale) ka bacdina ay ka timaado wadi (waxay ka mid tahay dareerayaasha ka yimaada xubinta taranka ,rag iyo dumarba) kama jabayo soomkiisu waxaase waajib ku ah inuu xubinta taranka maydho, salaadana u weyseysto.
- 5- Iska ridida ilkaha
- 6- Waxyaabaha qofka afka ka galo asagoon u qasdin
- 7- Inay mani ka timaado qofka riyo ahaan ama qarow
- 8- Dawooyinka dhagaha loo isticmaalo ama indhaha
- 9- Biyo haday qofka dhuuntiisa gaadhaan si kedis ah tusaale ahaan luqluqashada weysada oo kale

Bahda Mareegta Farshaxan

- 10- Waxaa qofka sooman u banaan inuu isticmaalo toothbrush ama toothpaste, waxaase ka fiican inuu iska dhaafo toothpaste-ta.
- 11- Dabaasha haba ahaato bad, webi, swimming pool iwm
- 12- Cadayashada waqtiguu doono haba ahaato qorax dhaca waxyar ka hor
- 13- Dhadhaminta cuntada ayadoo qofku uu ku dadaalayo inaanay dhuuntiisa gaadhin.
- 14- Cunid ama Cabitaan si oo ilowshiiyo ah nebiguna (scw) wuxuu yidhi “kiina cabba ama cuna asagoo sooman ilowshiiyo darteed ha dhamaystiro soomkiisa , waayo waxaa quudiyey oo waraabiyey Eebihiise” labada sheekh baa weriyey.

AFURITAANKA

Walaalkayga imaankow ku dedaal inaad afurtid markay cadceedu dhacdo taasi baanu Eebe inagu adoosaday korkaagana waajib kuma ah inaad sugtid aadaanka cibrona malaha guduudka ku hadha jihada qorax dhaca, sidaasi baana ah raacintaanka dhabta ah ee sunnada Nebigeena (scw) iyo khilaafida yahuuda, shiicada rawaafida(korkooda ha ahaato nacdasha eebe oo israacraacsaniye) iyo nasaarada waayo ayagu dib bay u dhigaana ilaa laga gaadho soo bixitaanka xidigaha, waxaanu nebigu ku tarbiyadeeyey asxaabtiisa inay sooman cadceeda dhaca ka dib sida ku sugan axaadiistani Cabdilulaahi ibnu Abii Awfaa(rc) wuxuu yidhi: waxaanu ahayn kuwo la socda Nebiga(scw) safar asagoo sooman ramadaan gudaheeda markay qoraxdii dhacday buuku yidhi (scw) mid ka mid asxaabtii hebelow(warinta Abuu daa’uud waxaa ku timiday inuu ahaa Bilaal) kac oo inoo samee afurka markaasi buu bilaal yidhi maad sugtid ilaa aad ka galabaysatid markaasi buu rasuulku yidhi deg oo inoo samee markaasu saxabigii ku celiyey nebiga inay wali maalin hadhsantahay markasi buu Nebigu markale amray ka gadaal buu saxaabigii sameeyey afurkii markaasuu cabay nabigu(scw) , saxaabigii wuxuu sii raacay haddii midkood uu fuuli lahaa awrkiisa waa uu arki lahaa cadceeda,markaasi buu nebigu yidhi haddii uu habeenku yimaado waa soomay ka afurani.Axmed,Bukhaari , Muslim iyo qayrkoodba.

Waxaana ka sugnaatay saxaaabada nebiga inuu waafaqay ficilkoodu hadalka nebiga, Abuu Saciid Alkhudrina wuxuu ahaa mid afura marka cadceeda baalkeedu qarsoomo. Bukhaari , Ibnu Abii Shaybah iyo qayrkoodba.

Raacitaanka sunnada Nebigeena (scw) bayna ku sugnaatay muujin aan muujinayno diinteena kuna faanayno waxa aynu ku sugan nahay oo hanuun ah, Eebe (sw) waxaan ka beryeynaa inuu inagu sugo diinteena, sidaasi bayna cadaynaysaa axaadiistan soo socota:

- 1- Suubanuhu (scw) wuxuu yidhi”annagu hadaanu nahay kulanka anbiyada (cs) waxaa nala faray inaan dadejino soomka, dibna u dhigno suxuurta, gacanta midigtana aanu saarto bidixda korkeeda markaanu salaada ku jirno” Ibnu Xibaan, Diyaa’al maqdasi, Sheikhu Naasirna wuxuu ku saxiixay kitaabkiisa qaaliga ah ee sifatu salaadka (waxaanafayda iyo walaaladayba ugu nasteexaynayaa inaan kitaabkaasi barano).
- 2- Sahal ibnu Sacad(rc) wuxuu yidhi: Rasuulku(scw) wuxuu yidhi “ dadku khayr ka tegi maayaan intay afurka dadejinayaan “Bukhaari iyo Muslim
- 3- Sidoo kale isla saaxibagani wuxuu Nebiga (scw) ka weriyey inuu yidhi “ dadku ka tegimaayaan inay sunadayda ku kor suganyihiin inaatay afurkooda la sugin xidigaha” Ibnu Xibaan (saxiix).

Bahda Mareegta Farshaxan

- 4- Abuu Hurayra (rc) wuxuu weriyey inuu Nebigu (scw) yidhi “diintu korbay ahaan intay dadku dadejinayaan afurka waayo yahuuda iyo nasaaradu dib bay u dhigaan afurkooda” Abu Daa’uud (xasan).

Waxa uu Nebigu (scw) ugu bishaarey qofka muslimka ah inuu leeyahay duco mustajaab ah waxaanu yidhi sida ku timiday xadiiska Ibn camr ibn Caas (rc) “ ka sooman afurkiisa agtiisa wuxuu leeyahay dacwo aan la celinin” Ibnu Maajah , Buusiirina wuxuu yidhi xadiiskani sanadkiisu waa saxiix, ragiisuna waa thiqaat. Waxyaabaha uu qofka soomani ku afurayo intaanu salaada maqrib tukanina waxaa ka mida:

b- Salmaan ibn caamir (rc) wuxuu ka weriyey nebigeena (scw) inuu yidhi “ midkiin markuu afurayo ha ku afuro timir, haddii uu waayo ha ku afuro biyo, waayo waa daahire” Imaam Axmed iyo Asxaabu sunanka , sheekhul Albaanina wuxuu ku saxiixiyey Jaamicul Saqiirka, Abuu xaatim ar-raazina waa saxiixey sida kutaala talkhiisul xabiirka Ibnu xajar.

t- Abuu Xamzah Anas Ibnu Maalik (rc) wuxuu yidhi suubaheenu(scw) wuxuu ahaa mid ku afura timirta nooca looyaqaan rudabka intaanu tukan salaada, hadduu waayona dhowr timrood (oo nooc kale ah) , hadduu waayona biyo ayuu qudhqudhin jiray” Imaam Axmed, Abu Daa’uud ,Tirmidi,Ibnu Khuzayma (xasan).

Qofka muslimka ahna waxa la gudboon inuu raaco sunaha Nebigeenu (scw) uu samayn jiray , dhaktarkii qalbiga, ahaana caalimkii umadda Ibnu Qayim(calayhi saaxaa’ibu raxmah) wuxuu yidhi: tani waxay ka mid tahay u dhibirsanaantii u Nebigu(scw) u dhibirsanaa umadiisa, waayo in jidhka gaajo ka gadaal waxa ugu horeeya ee galaa caloosha inuu noqdo wax macaan ayaa u haboonaan badan aqbalitaanka jidhka, uuna ku intifaacayaa, sidoo kale biyaha, waxaa ku dhaca beerka muddo markaanu qofku wax cunin nooc qalal ah, haddii biyo lagu qooyana in badan buu ku intifaacayaa qofku cuntooyinka uu cuni doono salaada gadaasheeda , Ibnu Qayim wuxuu sii raaciyey intaana waxaa lala qabaa waxyaabaha badan ee u sugnaaday timirta iyo biyaha oo ah inuu qalbigu ku wanaagsanaado taasi oo aanu garanayeyn mooyaane culimada qalbigu.

Ducooyinka laga soo weriyey Nebigeena (scw) ee uu qofka odhanayo markuu afuro waxa ka mid ah tani- - wax

soo saaray Abu Daa’uud, waxaanu yidhi Daaraaqudni sanadka xadiisku waa xasan. Micanaheduna waxa weeyi “haraadkii tag, xididadiina qoye, ajrigiina sugnaa insha=allah”.

Qofka muslimka ahina waa inuu ku dadaalayaa inuu afurkiisa ku cuno masaajidka si uu ula tukado jaamacada muslimiinta ah ee masaajidka kutukanaysa.

Waxa kale oo uu Nebigu (scw) yidhi “ ka soomani waxa uu leeyahay laba farxadood,marka uu afuro waxa uu ku farxayaa afurkiisa, marka uu Eebihiis la kulmana waxa uuku farxayaa soomkiisa” waxaa weriyey Abuu Hurayrah, Muslim baana kitaabkiisa ku soo saaray.

Galadaha Eebe (swc) ee faraha badan waxaa ka mid inuu inoo baneeyey inaan wax cuno ilaa salaada subax ka hor, wuxuu Bukhaari saxiixiisa kusoo weriyey,asagoo ka werinaya Baraa(rc) wuxuu yidhi: waxay ahaayeen saxaabadii Nebigu(scw) haddii uu midkood sooman yahay waqtigii afurkana lagaadho , ka dibna uu ka seexdo intaanu afurin mid aan waxba cunin habeenkaas iyo maalinta ku xigtaba ilaa laga gaadhayo habeenimada maalinta kale”, sidoo kale xadiis uu Bukhaari isla saxaabigaa kasoo werinayey waxaa ku sugnaaday “ inay saxaabadu ahaayeen kuwo aan u dhawaanin haweenkooda ramadaanta dhamaanteed”, Rabise(scw) arinkaasi imika waa baneeyey.

TARAAWIIXDA

Waa la jideeyey taraawiixda sida ku timiday xadiiska Hooyadeen Caaishah(rc) ay tidhi: Nebiga(scw) ayaa habeen baxay saqbadhkii kuna tukaday masaajidka ragbaana la tukaday salaadiisii, barqadiina dadkii way ku sheekaysteen, habeenkii xigayna in intii hore ka badan baa timiday, habeen sadexaadkiina intii inka badan, habeen afraadkii markii la gaadhay ayaa masaajidkii dadkii qaadi waayey Nebiguna(scw) wuxuu u soo baxay salaadii subax, markuu dhameeyey buuna soo qaabil xagoodii, hadalkiina furfurfay, waxaanu ku yidhi igama aanay qarsoonayn joogitaankiinu selaakiin waxaan ka baqday in la idinku waajibyeelo korkiina, ka dibna aad ka tabardaraysaan, waxaanu dhintay Nebigu(scw) ayadoo arinku sidaa yahay* Bukhaari iyo Muslim.

Markuu Nebigu(scw) haleelay rabigiis, shareecadiina sugnaatay, waxa suushay cabsidii Nebiga(scw), salaadii taraawiixeedna in jamac lagu tukato bay ku sugnaatay. Waxaana nooleeyey sunnadani Amiirkeeni Cumar ibn Khadaab (rc) ahaa siduu weriyey Cabdiraxmaan Ibnu Cabdin Alqaarii waxaanu yidhi: waxaan raacay Cumar (rc) habeen ramadaan ilaa masaajidka waxaanu tagnay ayadoo dadku ay kali iyo koox koox u tukanayaan, qaybiba imaan gooni ahi uu tukinayo, markaasuu cumar yidhi waxaan arkaa haddii dadka la iskugu keeni lahaa imaan kaliya sidaasi baana wanaagsanaan lahayd, ka dib waa uu goostay waxaanu imaam ka dhigay Ubayi Ibnu Kacab (rc).

Markale baanu wada tagnay aniga iyo cumar (rc) masaajidka ayadoo dadkii ay salaadii wada tukanayaan markaasuu cumar (rc) yidhi: wax cusub tani baa u wanaagsanaan badnaatay, tase ay ka seexanayaan baa ka fadli badan, waayo waxay ahaayeen kuwo ka tukada habeenka galinkiisa hore”Bukhaari.

TIRADA RAKCADAHA

Culimadu waa isku khilaafeen tirada rakcadaha, ilaa laga soo weriyey sideed qawl oo kala ah sidani : 41,36,34,28,24,20,16 iyo 11 rakcadood, khilaafka ka dhacay culimada dhexdooduna ma aha mid oo ka dhigaya masaladan mid aanu ku soo iman qowl saxiix ah, culimada islaamkuna hore ayaa ay iskugu khilaafeen waxyaabo badan, tusaale ahaan culimadu waxa ay isku khilaafeen gacmo kor u qaadida salaada gudaheeda ilaa qaar ay gaadhsiyeenba inay salaadu ku jabayso, sidaasina ay ku khilaafeen sunadii Nebiga(scw), ta inala gudboonina ay tahay inaga inaan u noqono kitaabka rabi iyo sunadiiisa waxay inoo sheegeena aan qaadano, culimada khaladka ku dhacay aynu u cudurdaarno haddaba qawlka waafaqsan hanuunkii nebigu (scw) waa inay tahay sideed rakcadood marka laga reebo witriga waxaan u daliil ah xadiiska Hooyadeen Caaishah (rc) ay tidhi “ ma aanu ahayn Nebigu(sc) mid ka siyaadiya ramadaan iyo qayrkeedba kow iyo toban rakcadood” Bukhaari iyo Muslim.

Waxaana sidaa ku waafaqay Jaabir ibnu Cabdilaahi (rc) waxaanu sheegay “ Nebigu (scw) markuu dadka tukiyeey habeen ramadaan inuu tukiyeey sideed rakcadood ka dib uu witriseysatay” Ibnu Xibaan waana sanad xasan ah shawaahidiisa marka loo eego sida ay ku sheegeen labada sheekh sulaym iyo cali alxalabi risaaladooda sifatu siyaami nebi(scw). Culimada ku tilmaamtay inaanay baanayn in laga siyaadiyo intaa aan soo sheegnay tusaale ahaan waxaa ka mid ah imaamu maalik, imaamu ibnul carabii, waxaanu cadeeyey imaamu sancaani sida ku taala kitaabkiisa qaaliga ah ee uu ku sharxayo buluuqul maraamka inay tahay labaatanka rakcadood ee la tukanayaa bidco.

Waqtiga salaadan sharafta leh la tukanayaan sida aan wada garanayno waxa weeyi cishaa’iga ka dib waxaana u daliil ah hadalkii nebiga “ Eebe wuxuu idiin siyaadiyey

Bahda Mareegta Farshaxan

salaad waana witriga , tukadana inta u dhaxaysa cishaa'iga iyo salaada fajar” Imaam Axmed , silsilatu saxiixa (108).

In habeenka galinkiisa danbe la tukado baana fadli badan qofkay u fududaato hadalkii Nebiga (scw) dartii “ ka ka baqa inaanu toosin habeenka galinkiisa danbe, galinkiisa hore ha iska witrileysto, kase rajaynaya inuu tukado habeenka galinkiisa danbe ha witrileysto habeenka galinkiisa danbe,maxaa yeelay salaada xiligaa la tukataa waa mid laga markhaati yahay, taasaana fadli badan” Muslim.

QAABABKA LOO TUKANAYO TARAAWIIXDA

Waxaa ka asaxday Nebiga (scw) inuu u tukaday qaabab kala duwan waan sidan hoos ku qoran:

- 1- 13 Rakcadood, laba rakcadood oo fudud buu ku bilaabanayaa (labada cishaa'iga ka danbeeya sida uu xoojiyey sheekh Naasir ama laba u gaar ah), ka dibna wuxuu ku tukanayaa laba dhaadheer, ka dibna laba ka yara gaaban kuwii hore, ka dibna laba ka sii gaaban labadii ka horeeyey, ka dibna laba intaba ka wada gaaban, ka dibna waa uu witrileysoanayaa .
- 2- 13 Rakcadood, sideed laba laba uu u tukanayo, ka gadaalna shan witrifa oo aanu fadhiisanayn ilaa rakcada shanaad.
- 3- 11 Rakcadood, asagoo laba laba u tukanaya, kuna witrifaya gabogabada hal witrifa ah.
- 4- 11 Rakcadood, wuxuuna tukanayaa afar xidhiidhsan, ka dibna afar kale, ka dibna saddex witrifa.
- 5- 11 Rakcadood, wuxuu tukanayaa sideed xidhiidhsan mana fadhiisanayo ilaa rakcada sideedaad waanu ataxiyaadsanayaa ka dibna wuxuu ku saliyayaa Nebiga (scw), ka dibna waa u kacayaa kama baxayo salaada wuxuuna tukanayaa rakcad kale ka dibna waa uu ka baxayaa salaada, intaa ka gadaal asagoo fadhiya baa uu tukanayaa laba rakcadood.

Qaababkaasi baa kasugnaaday Nebiga (scw) , waxaana suurtoagal ah in qaababka qaarkood witrifa wax laga dhimi karo ama lagu kordhiyo, qofkii doonaya axaadiista tusaysa qaababkan aan kor ku soo sheegnay ha u noqdo risaalada Sheekhul Albaani (rx) ee salaatu taraawiix la yidhaahdo, safxada 86-96.

LAYLATUL QADR

Habeenkan sharafta badani waa uu ku jiraa tobanka danbe ee bishan barakaysan, qofka muslimka ahna waxaa la gudboon inuu dadaalo tobanka danbe ee ramadaan dhamaantood si uu u waafaqo habeenkani, waxaanu bilaabmaa habeenka 21naad , allahna(scw) waa uu qariyey habeenkani habeenka uu yahay, nebigana (scw) waxaa ka sugnaatay axaadiis tilmaamaysa inaanu habeenkani ku khaas ahayn habeen kaliya ee ay suurtoagal tahay inuu noqdo 29,27,25,21, iwm. Waxaanu yidhi imaamu shaafici (rx) waxaad moodaa agtayda eebe ayaa u ogaalbadane inuu nebigu ahaa mid oo ka jawaab kolba su'aasha la weydiiyo, waxaa lagu odhan jiray ma ka doondoona habeenka sidaasi iyo sidaasi ah wuxuu odhan jiray: ka doon doonaa habeenka sidaasi iyo sidaasi ah. Waxaana aad loogu rajayn badanyahay tirada kinsiga ah, waxaana sunada Nebiga (scw) ku soo aroortay in nebiga la tusiyey habeenka ay tahay ka dibna laba nin oo muslimiinta ka mid ahi ay doodeen sidaasina uu nabigu ku iloobay, nebiguna uu yidhi waxa laga yaaba inay sidani idiin khayr badantahay, ka doondoona habeenka 25,27,29. Bukhaari

Xadiiska hooyadeena Caa'ishah (rc) waxay tidhi “ waxa uu ahaa Nebigu(scw) marka uu soo galo tobanka danbe ee ramadaan mid nooleeya habeenka (cibaado iwm),

Bahda Mareegta Farshaxan

ehelkiisana toosiya, dadaalana, guntigiisana xidha(sarbeeb ahaan yacnii ka fogaado ehelkiisa ku dadaalid uu ku dadaalayo cibaadada darteed maahin inay xaaraan tahay). Muslim .

Ibnu cumarna (rc) waxaa sidoo kale wuxuu weriyey inuu Nebigu yidhi “ ka doondoona laylatul qadriga tobanka danbe ilaa akhirl xadiis” Muslim.

Habeenkan qaaliga ah fadligiisa waxaa ka mid ah inay cibaadadiisu ay ka khayrka badantahay kun habeen, Eebana (scw) uu soo dejiyey quraankiisa, malaa’iigtuna ay soo degto iyo malaku jibriilba, waana habeen nabadgelyo ilaa habeenka waagiisu ka beryayo.

Waxyaabaha lagu garatona waxaa ka mid ah

- 1- Inuu yahay habeen xasiloon, maaha kulayl iyo qabow toona.
- 2- Dabayli ma jirto
- 3- Cadceedu waxay soo baxdaa ayadoo bilaa shucaac ah,cas, daciifna ah].

Nebiguna (scw) waxa uu yidhi “ka kaca habeenka laylatul qadrka asagoo rumaysan, Eebana (sw) ajri kaga dalbaya, waxaa loo dhaafaa danbigiisii hore” Bukhaari iyo Muslim. Allahna waxaan weydiisanaynaa inuu inaga yeelo kuwa uu waafajiyo laylatul qadriga marar badan camalkeena inuu ka yeelo ku aan u sameyno Eebe (sw) dartii.

ICTIKAAFKA

Ictikaafku waa inuu qofku ku sugnaado masaajidka asagoo daacada Eebe (sw) badsanaya, qalbigiisana ku mashquulinaya dikriga Eebe (sw) ka fogaynayana qalbigiisa aduunka , goynayana xidhiidhka ka dhexeeya asaga iyo makhluuqa lana xidhiidhaya Eebihis (sw).

Ictikaafku waa banaanyahay waqti kasta hase ahaatee wuxuu fadli badanyahay siina fiicanyahay bisha ramadaan samaynta Nebigu (scw) uu sameeyey iyo daa’imidii uu daa’imay darteed, Bukhaari iyo Muslim waxay ka soo weriyeen Hooyadeen Caaishah (rc) inay tidhi: Rasuulku(scw) wuxuu ahaa mid oo ictikaafa tobanka danbe ee ramadaan ilaa Eebe (sw) uu ka oofsaday” ictikaafkana waxa loo shardiya

- 1- Niyo
- 2- Inuu qofku ku ictikaafdo masaajid

Waxaana burinaya ictikaafkiisa haddii uu haweenaydiisa la mubaasharoodo, sidoo kale ma ha qofka inuu masaajidka ka baxo ama uu janaaso xaadiro, ilaa inay lagama maarmaan noqdaan mooyaane sida inuu u baahdo inuu dhar ka soo qaato gurigiisa qabowga oo darnaaday darteed ama afurkiisa haddii cid u keentaa aanay jiran ama inaanay jirinba qofka dhintay cid maydhaa asaga mooyaane waxaa iyo wixii la mid ah.

Waa u banaantahay inuu muraadkiisa ku dhamaystirto telephone.

Qofka hadday u sinaato inuu ictikaafdo iyo inuu umada arimahooda ka shaqeeyo, waxaa markaasi fiican inuu iska dhaafdo ictikaafka umada arimaheedana uu dhameeyo, waayo ictikaafku waa wax asaga ku gaar ah amaa umada arinteeda inuu xaliyaa waa nafci balaadhan ajri badana uu ka helayo haddii uu u sameeyo alle dartii.

Haweenayda waa ay u banaantahay inay masaajidka ku ictikaafdo haddii fitno iyo dhib laga aamin noqdo, waxaanu qofku galayaa meesha uu ku ictikaafayo subaxnimada maalinta 21 naad bacda salaada subax siduu Nebigu (scw) samayn jiray ayna ka soo werisay Hooyadeen Caaishah (rc) , Bukhaari iyo Muslim baana weriyey.

SUXUURTA

Eebe (sc) waxa uu inagu waajib yeelay soomka siduu ugu waajib yeelay kuwii inaga horeeyey ee ahlu kitaabka, waxaanu ahaa waqtiga iyo xukunkuba mid waafaqsan sidii ahlu kitaabka, oo ahayd inaanu qofku wax cunin, cabina, haweenaydiisana u dhawaani hadduu seexdo ka gadaal,markii la nasakhay arinkaasi Allah Rasuulkiisu wuxuu faray suxuurta ayadoo lagu kala duwayo soomkeena iyo soomkii ahlu kitaabka.

Camr ibn Caas (rc) wuxuu weriyey inuu rasuulku yidhi waxa u dhaxeeya soomkeena iyo ka ahlu kitaabku waa cunida suxuurta. Muslim .

Fadliga suxuurtanu waxay ku timiday axaadiistani Cabdulaahi ibn Xaarith wuxuu ka weriyey nin ka mid ah saxaabadii rasuulka inuu yidhi : suxuurtu waa barako Eebe idin siiyey ee ha ka tegina” Imaamu Axmed iyo Nasaa’i (saxiix)

Barakada ugu weyn ee suxuurtuna waxa weeyi in Eebe uu ku caam yeelo kuwa suxuuranaya danbidhaaf, naxariistiisana uu dhunbinayo,malaa’iigtuna ay danbidhaaf qofkaasi Eebe u waydiinayso, Abuu Saciid Alkhudri wuxuu Nebiga(scw) ka weriyey inuu yidhi : “ suxuurtu waa cunid barako, ha ka tegina haba ahaato qudhqudho biyo ahe, waayo Eebe(sw) iyo malaa’iigtiisu waxay u duceeyaan kuwa suxuurtee” Imaamu Axmed iyo Ibnu Abii Shaybah.

Waxaana wanaagsan inuu qofku dib u dhigo ilaa waqti u dhow salaada subax ,waxaana ka sugnaatay saxaabadii nebige ay Nebiga(scw) la suxuurteen ka bacadina ay salaadii u kaceen lana weydiiyey intii u dhaxaysay aadaanka iyo suxuurta? Ayna ku jawaabeen inta laga akhriyi karo konton aayadood (qiyaas ahaan 10-15 daqiiqo) waxaa weriyey xadiiskan Anas ibn Maalik (rc) oo ka weriyey Zayd ibn Thaabit(rc), Bukhaari iyo Muslim baana kutubtooda kusoo saaray.

Haddii ay dhacdo in qofku asagoo suxuuranaya uu maqlo adaanka subax (nimcadaa aynu ka qadnayn sidaynu uga nimidnay wadankeeni, keena ugu fiican uu yahay ka maqla marka uu masaajidka kudhex jiro) weelkuna uu gacantiisa ku jiro ma aha inuu dhigo ilaa uu maraarkiisa ka dhamaysanayo waxaana weriyey xadiiska Abuu Daa’uud iyo qayrkiiba, waxaanse u banaanayn inuu cunto kale soo qaato oo aan ahayn ta gacantiisa ku jirta.

Waxaana wanaagsan inuu qofku ku suxuurtu sida nebige (scw) ka sugnaatay timir, waanay u banaantahay inuu ku suxuurtu timir waxaan ahayn.

ZAKATUL FITRI

Xukunka zakaatul firtigu waxa weeyi inay tahay waajib sida Ibnu Cumar (rc) uu ka weriyey Nebige (scw) rasuulku wuxuu faray yeelay dadka korkooda zakatul firtiga bisha ramadaan gudaheeda” Bukhaari iyo Muslim.

Cida ay ku waajibaysaana waxa weeyi ka yara , ka weyn, labka , dhediga, xorta, adoonka muslimiinta ah, waxaana laga bixinayaa saac timir ama heed ah, sida Ibnu Cumar uu Nebige ka soo weriyey (scw) Bukhaari iyo Muslim.

Waxa kale oo la bixin karaa zabiib, caano gadhoodh ah, bariis, baasto iyo wixii la mida, qofkuna wuxuu ka bixinayaa naftiisa iyo cida uu masuulka ka yahay waxaanu siinayaa cida uu doono ee u baahan, culimada qaarkood waxay yidhaahdeen waxa uu siin karaa inta ku sugan ayaada (24) ee suuratu tawbah oo kaliya, wax daliil ahna malaha Sheekh Islaam Ibnu Taymiyana wuxuu ku radiyey majmuucul fataawihiiisa, sidoo kale ardaygiisa qaaliga ahaana (Ibnu Qayim) kitaabkiisa Zaadul Macaadka.

Waqtiga la bixinayaana waxa weeyi dadku salaada ciida intaanay tegin ilaa salaada laga gaadhayo, waana u banaantahay qofka inuu bixi laba cisho ka hor ciida umase

Bahda Mareegta Farshaxan

banaan inuu bixiyo ka gadaal ciid ilaa qof cudurdaar leh mooyaane sida inuu qofku qof kale iga sii bixi ku yidhi qofkiina iska iloobay ama in bisha si oo kedis ah loogu sheegay iwm, haddii uu bixi ciida kale gadaal cudurdaar la'aana waxay noqonaysaa sadaqo caadi ah. Sababta loo jideeyey zakaatul fitrigunna waxa weeyi in qofka soomani uu ka daahiriyo naftiisa gafafka ka dhacay, walaaladiisa baahana uu maalintaasi quudiyo kana farxiyo si ay ula wadaagaan damaashadaadka.

Waxaa haboon inuu qofku siiyo meesha uu joogo ciida la joogta, haddise aanay jirin cid qaadanaaysa ama meel kale baahi darani ka jirto waxa u banaan inuu u diro halkaasi, waxaaanu qofku ku bixinayaa cunto ahaan, haddiise qofka miskiinka ah ay u fiicantahay lacagtu inuu lacagta siiyo wax dhib ahi kuma jirto.

FADLIGA RAMADAANTA

Allah subxaanahuu watacaalaa wuxuu ku gaaryeelay bisha ramadaan fadliyo badan waxaana ka mid ah

- 1- inuu Eebe soo dejiyey bisha gudaheeda Quraanka sharafta badan
- 2- in soomka lagu waajib yeelay dadka muslimiinta ah
- 3- in la furo janada lana xidho naarta
- 4- in la katiinadeeyey shayaadiintii dadka xumaanta u qurxinaysay
- 5- xasanada in la laalaabo
- 6- inuu dareemo ka Eebe uu hodanka ka dhigay walaalkiisa tabaalaysan ee saboolka ahi nolosha uu ku jiro taasina ay u sababto inuu waxtaro.
- 7- Inuu qofku adkaysi yeesho ,kuna sabro daacada eebe kana samro xumaanta , dhibka soo gaadhanaya uu ku sabro.
- 8- Caafimaad inuu u sababo soomku
- 9- Qofka xumaan ka caado dhigtayna inuu ka go' xumaantii sida qaadka iyo sigaarka, sababna uu u noqdo soomko iska dayntooda.
- 10- Dadka muslimiinta ahina inay dareemaan inay umad kaliya wada yihiin , intaa iyo wixii la mid ahba.

TOBAN DARIHQ OO AAD UGA FAA'IIDAYSAN KARTO RAMADAANTA

- 1- Inaad isku daydid inaad dacwada gaadhsiisid magaalooyinka iyo tuulooyinka kugu xeeran , una sheegtid walaalahaaga kula nool khayrka adigoo isticmaalaya hadal dhibirsan, u hadiyeena muxaadaroooyinka, kububta, websites, rasaa'ilka iwm.
- 2- Qofku haddii uu ka mid yahay bishan ramadaan dadka caadada ka dhigtay daawashada tvga iyo musalsalaadka umadii rabigood lagu ilowsiiyey, inuu isku dayo inuu iska dhaafo, ehelkiisana ugu nasteexeeyo, walaahi waxaa jira rag iyo dumar jecel inay iska dhaafaan daawashada waxaasi markayse arkaan lamaanahooda oon uba soo jeedin kuna maqan musalsalka , waxay ku dhaqankeedii imanayaa maahmaahdii soomaaliyeed ee sida xun loo fahmay ee ahayd haddii meel lagu il laayahay adna isha la iska tiraa, qofka muslimka ahina waa inaanu ka daalin u nastee xaynta walaalkii ,badiyaana beryada eebihis, si aanay cadho ku jirin wax ugu sheegaa walaalkiisa ama walaashiisa ku mamam daawasha musalsalaadka iwm.
- 3- Muslimku waa inuu ducada badiyaa afurka ka hor, waayo Nebigu(scw) wuxuu yidhi saddex duco waa kuwo la aqbalayo, ducada ka sooman, kala dulmiyey iyo ka safarka ku jira” ayadoo ay sidaa tahay ayaa hadana in badan oo inaga mid ahi aynaan ka faa'iidaysanayn, walaalayaal aan badino ducada xiligan inaga oo u ducaynayna nafteena iyo walaalaheena muslimiinta ee tabaalaysan

Bahda Mareegta Farshaxan

meel kasta oo ay joogaanba khaasatan wadankeeni iyo umadeena ku sugan xaalada eebe oo kaliya ahi uu ogyahay, una weydiino eebe kuwa dhintay naxariis , kuwa dhaawacana caafimaad iyo ajri, hablaha walaalaheena ee la fara xumeeyeyna intaan maqalnay iyo intaynaan maqalba oo ah inta badan aan eebe u berino danbigooda inuu dhaafo, samirkana waajafiyo , asturana, kuwii waxaa xilka leh ku sameeyeyna uu ku abaalmariyo waxay mutaysteen, kana saaro wadankeena xabashida AIDSka qabta iyo daba dhilifyada hungurigu ka xooga roonaaday, iskuna soo celiyo umada soomaaliyeed ee cadowgu kala qaybsaday iskuna diray.

- 4- U samofalka waalidka, inaad caawisid, waxay ku faraana aad samaysid, lana afurtid, waxyaabaha ka gaabinta xaqa waalidkana waxa kamid ah in hablaha iyo wiilashuba ay badiyaan seexashada maalintii iyo dhafrida habeenkiiba, ka dibna hooyadii ay kaligeed gasho madbakhii si ay u diyaariso afurkii iyo cuntadii kaleba, waxaana laga yaabaa haddii ay hooyadu farto inanteeda inay wax la qabato inay ku qayliso, amar diidona la timaado, inanta noocaas ahina eebaheed ha ka baqato ducana hooyadeed ha ka shaqaysato, sidoo kalena inanka wax ma taraha ah.
- 5- In qofku uu naftiisa caado uga dhigo ka tegida xumaanta, waxyaabaha ugu adkaanshaha badan in laga tagana waxaa ka mid ah waxyaabaha uu qofku ka caadada dhigtay, hadaba ramadaantu waa fursad qaaliya ayna suurto gal tahay inuu qofku ka fogaaado wuxuu caadaystay sida daawashada waxyaabaha xun , xanta iyo isku dirka, dhagaysiga heesaha, hadal xumaanta iwm. Walaalkayga qaaliga ahow eebaha talo saaro, noqona mid go'aan adag , hamigiisuna sareeyo, yeyna kaa xoog roonaanin waxay naftaadu jeceshahay, ma haboontahay inaad adigoo qof muslim ah eebihiisna kali yeelaya , tukanaya, hadana inay kaa xoog roonato xabad sigaar ahi oo ur , qudhun iyo caafimaad daro waxaan ahayn aanad ka helayn, walaahi taasi waa wax aanu jeclayn gofkasta oo damiir lihi, **fikir hadaba!**
- 6- Qoyska muslimka ahi waa unuga iyo meesha aasaaska u ah umada islaamka, hadii qoysku wanaagsanaadana waxaa loo rajaynayaa islaamka kor noqosho, hadii kalese midhaheedii waan haynaa imika, hadaba waxyaabaha dhaliya isku xidhnaanta waalidka iyo ubadkooda waxaa ka mid ah inuu u qoondeeyo waalidku ubadkiisa waqti uu ku ogaado waxbarashadooda iyo waxa ay tabanayaan , ramadaantu waxay ka mid tahay waqtiyada uu waalidku firaaqooyin badan haysto , haday sidaasi tahay waxaa waalidiinta la gudboon inay ku dadaalaan barida ubadkooda diinta rabi , jeclaysiiyaan cibaadada eebe, waalidkastaana wuxuu jecelyahay inay ubadkiisu bartaan diintooda hase ahaatee ma aha mid ku imanaysa dadaal la'aan, wanaagsanaan lahaydaa haddii waalidku uu ubadkiisa u qabto tartan dhexdooda bisha ramadaan iyo bilaha kaleba , ilmo kasta inta aayadood ama xadiis ee uu xifdiyo lagu abaalmariyo, waxyaabaha ubadka aqoonta jeclaysiiyana waxa ka mid jaa'isadaha iyo dhiirgalinta.
- 7- Inaad soo dhawaysid walaalahaaga aan masaajidka aqoonin ilaa ramadaanta mooyaane, una sheegtid arinka ay samaynayaan xumaanta uu leeyahay, ka dib markaad hanatid qalbigooda, kulana hadashid hadal dabacsan aanadna kala bakhaylin cilmiga eebe ku baray, una hadiyeysid cajaladaha islaamiga ah iwm.
- 8- Isku day inaad fahantid Quraanka eebahaa, badanaa inta aan dhamayno quraanka, qaarkeena hamigooda ugu weyn uu yahay kaliya inay suurada dhameeyaan, waxay ahaayeen salafkii umadani kuwo ku dadaala akhrinta quraanka iyo fahankiisa bishani, waxaana inala gudboon inaan ku dayano kuna dadaalno barashadiisa tajwiid ahaan (hana ka xishoon akhii hadaanad

Bahda Mareegta Farshaxan

aqoon, qofkastaaba mar buu bartaaye , kuna dadaal inaad u akhrisid quraanka sidii eebe ugu talagalay) iyo tafsiirkiisaba si aan u fahano hadal eebe ee sharafta badan.

- 9- Haweenayda muslimada ah waxa korkeeda ahaatay, inay ku dadaasho gudashada salaadaha faralka ah waqtigooda si khushuuci ku dheehantahay khaasatan bishan barakaysan ee xasanaadka la laalaabay sidaan kor ku soo xusnay. Hadaba dumarka qaarkood marka ay u timaado arinta eebe uu korkooda yeelay dumarka ilma aadam-caadada iyo dhalhada- waxaa ku dhaca inay ka tagto camalkii wanaagsanaa, sidaana ay ku noqoto haweenaydu mid nafteeda ka xarintay fadliga bishani haba ahaato haweenaydu mid ka tegaysa soomka iyo salaada selaakiin waxaa u furan dariiqooyin badan sida ducada, tasbiixda, istiqaarta, sadaqada , inay afurisno hablaha walaalaheeda ee sooman sidaasina ay ku hesho ajri la mid ah kooda. Nebiguna (scw) wuxuu yidhi “ haddii uu xanuusado adoonku ama uu safar galo waxa uu eebe u qoraa ajri la mid ah kii uu samayn jiray markuu caafimaadka qabay ee uu nagaan” Bukhaari. Hadaba , bishaarayso walaashayda muslimada ahey, soona xaadiri niyadaada, allena u gaar yeel, kuna dadaal khayrka iyo cibaadooyinka aad karaysid, hadaan u nimaadno akhrinta quraanka culimada dhexdooda khilaaf baa ka jira, in badan waxay u janjeedhaan inaanay haweenaydu quraanka akhriyeyn, dhanka kale in badani waxay arkaan inay akhrinayso tusaal ahaan culimada banaynaysa waxaa ka mid Shaykhul Islaam Ibnu Taymiyah, sidan baanay adiladu xoojinaysa sida ku timiday xadiiskii hooyadeen Caa’isha (rc) ee uu ku lahaa Nebigu(scw) ma xayday? Samee waxa uu samaynayo ka xaajiga ahi hase dawaafin kacbada” ka xaajiga ahi waxyaabaha uu samaynayo waxaa ka mid ah quraan akhrinta sida iska cad.
- 10- Inuu soo cumraysto qofku bishani haddii duruufu u saamaxdo.

BARAARUJIN IYO DARDAARAN

Walaalahayga muslimka ah waxaan ku baraarujinayaa kula dardaarmayaa arimahan soo socda

- 1- Ku dadaal akhilfaadil inaad ka soo qaybgashid salaada taraawiixda habeenkasta , samirna la kaalay.
- 2- Ku dadaal inaad ku tukatid salaada maqrib masaajidka.
- 3- Ha dayicin labada rakcadood ee cishaa’iga ka danbeeya inaad tukatid taraawiixda ka hor.
- 4- Iska ilaali inaad soo jeedka badisid habeenkii, si aanay kaaga tegin salaada subax.

Kuna dadaal dabaqaada axaadiista iyo ku camalfalkooda

- 1- Umu Xabiiba (rc) waxay nebiga ka soo werisay inuu yidhi “ ka tukada habeenka iyo maalinta 12 rakcadood waxaa looga dhisaa guri janada : 4 duhurka ka horeeya iyo 2 ka danbeysa, 2 maqribka ka danbeeya , 2 cishaa’iga ka danbeeya iyo 2 da subaxa ka horeeya” Tirmidi (saxiix).
- 2- Anas bin Maalik (rc) wuxuu yidhi : Rasuulku (scw) wuxuu yidhi : “ qofka u tukada alle dartii 40 maalmood salaadaha jamaca la jirkiisa, asagoo soo haleelaya allahu akbarta kowaad, waxaa laga beriyeelaa laba arimood, naarta iyo nifaaqa” Tirmidi (xasan).
- 3- Abuu Hurayra wuxuu Nebiga (scw) ka weriyey inuu yidhi asagoo la hadlaya saxaabada “kiinee maanta waaberiistay asagoo sooman? **Abuubakar** baa yidhi aniga, markaasu nebigu marlabaad yidhi: kiinee baa tegay janaaso?

Bahda Mareegta Farshaxan

Markaasuu isla **abuubakar** yidhi aniga, marsadexaad buu nebigu yidhi : kiinee baa quudiyey miskiin? Markaasuu **abuubakar** yidhi aniga, ka dib buu rasuulku yidhi : kuma kulmaan qof arimahaasi maalin kaliya ilaa janaduu galaa” Muslim. Saxaabiga sharaftaasi leh ee khayrka sidaa ugu dadaalayey bay shiicana u quudhay inay eebe ugu dhawaadaan nacdashiisa, ayaga nacdasha eebe oo is raacraacsani korkooda ha ahaatee.

Allahu akbar, walaalayaal waxaa korkeena saaran inaan ka faa'iidayano axaadiistan iyo kuwa aynaan halkan ku sheeginba. Waxaana qofkasta oo muslim ah ku waajib ah inuu barto diinta eebe, si uu u fahmo , camalkiisuna u noqdo mid sidii rabi rabay ah, Camaar ibn Yaasir wuxuu nebiga ka maqlay asagoo leh “ ad]oonku waa tukanayaa salaada mase loo qoraya ilaa marka salaada loo qaybiyo toban meelood meel ahaan, marka sagaal loo qaybiyo meel ahaan ilaa uu nebigu ka gaadhsiiyey marka laba loo qaybiyo meel ahaan.” Sababta arinkaasi keentay waxa weeyi aqoonta, qofku inta uu sidii la rabay u dhowyahay baa ajrigiisuna u badnaansho badanyahay.

Cilmigana qofku ma ogaado ilaa uu dhadhamiyo qadhaadhka aqoondarada, waxaa ku dhacday imaam ka mid ahaa rag muslimiinta ugu aqoonta badan, qisadan la yaabka leh, qaarkiina aad ku qosli doontaa, kase turjumaysa xaqiiqada dhabta ee qofka uu jahligu gaadhsiiyey, intaynaan sheegin imaamka magaciisa, wuxuu ahaa wiilkan dhalinyarada ahi mid ku nool wadanka suuriya magaalada xalab, iskana ah jaahil, qabowga magaaladanina waa mid aad u daran xiliyada qaarkood, waxaa dhacday habeen habeenada ka mid ayuu seexday wiilkan dhalinyarada ah ka dib inuu qarway, waqtiguna waa jilaal (guryahoodana heaters ma ay oolin) waxa uu u baxay inuu janaabada iska maydhay mise barkadiiba baraf baa dul heehaabaya , wiil asagoo jaahil hadana eebihis ka baqanaya buu ahaa waa uu iska jajabiyey barafkii waanu ku maydhay si degdeg ah buu uga baxay barkadii waxaanu u cararay furaashkiisii diiranaa, ka dibna waxaa ka xoog roonaaday indhiisii waanu gamay, hadana waa uu qarway, waxaanu ku noqday barkadii oo barafku dulfadhiyo wuu ku dhacay si degdeg ahna wuu uga baxay, furaashkiisii diirana baanu tegay, hurdadii baa ka xoogroonatay waanu gamay , mar sadexaad buu riyooday hadana, barkadii qaboobaydna way sugaysaa ilaahay buu talosaarto wuuna ku dhacay , selaakiin markani cabsi darteed dhinaca dhulka muu dhigin, si aanu mar afraad u riyoon, salaadii subax markay gaadhay buu masaajidka tagay markuu tukaday buu sheekhii ku yidhi “ xalay waxaan ku dhawaaday inaan naftayda dilo” wixii dhacayna wuu u sheegay, sheekhiina wuxuu ugu jawaabay waxaa kugu filnayd inaad gabogabaysatid.

Jawaabtanina waxay ku dhalisay wiilkii dhalinyarada ahaa inuu naftiisa dib ugu noqdo, halkaasi buuna ka bilaabay barashada diinta ilaa uu ka noqday caalim, kitaabkiisuna uu ka noqday kitaabka labaad ee lagu sharaxayo saxiixul bukhaariga , haddii u weheshan lahaa jahliga, iskana weynayn lahaa barashada cilmiga, waxa uu ku sugnaan lahaa aqoondaradiisa kuna dhiman lahaa laguna iloobi lahaa.

Yaa idinka mid ah ee gartay imaamkan qaaliga ah? Yaase garanaya xaafidu ibn xajar ninkay ooryo walaalaha ahaayeen? Imaamkan waxa weeyi **Imaamul Cayni**, kitaabkiisana waxaa la yidhaa Cumdatul Qaarii , ardayda xaqa culimada garanaysaana aad bay uga faa'iidaystaan inkasta oo uu sheekhu ku dhacay inuu awilo sifaadka qaarkood eebana aan danbi dhaaf u waydiinayno , waxaase yar cidaan khalad ka dhicin.

Hadaba walaalayaal aan ku dadaalno aqoonta diiniga iyo ta maadiga ahba.

Intaan qornay inta xaq iyo sawaab ah eebe galadiisa bay ku sugnaatay, intaan ku gafnay aniga iyo naftayda bay ka ahaatey , eebe iyo rasuulkiisuna bari bay ka yihiin, waxaan eebe uga beryeyaa walaal kasta oo faafiya walaaladiisa kalena gaadhsiiyo inuu allah danbigiisa dhaaf, galadiisana ku manaysto.

Bahda Mareegta Farshaxan

Sidoo kale waxaan eebe ka beryeynaaa inuu ina gaadhsiiyo ramadaan badan noqonana kuwa ka faa'iidaysta.

Waxaan hadalkayga kusoo dhamaynayaa xadiiskan nebiga(scw) ee Jaabir ibnu Samurah(rc) uu soo werinayo inuu nebigu(scw) yidhi: “ waxa ii yimiday malaku Jibriil(cs) waxaanu igu yidhi : Muxamadow (scw) ka gaadha labadiisa waalid mid ka mid ah ,ee dhinta naartana gala alle ha ku fogeeyo waxaanu igu yidhi: dheh aamiin waxaan idhi aamiin , hadana wuxuu yidhi: Muxamadow ka gaadha ramadaanta ee dhinta asaga oo aan loo danbi dhaafin,sidaana naarta ku gala alle ha ku fogeeyo, aamiin dheh aamiin baanan idhi, mar sadexaad ayuu yidhi malaku Jibriil(cs): Muxamadow ka lagu xuso magacaaga agtiisa ee aan kugu saliyin sidaana ku dhinta naartana gala alle ha ku fogeeyo, aamiin dheh markaasaan idhi buu leeyahay Nebigu(scw) aamiin” waxaa weriyey Dabaraani, waxaana saxiix yeelay sh.Muxamed Naasiru-diin Al-albaani raxmatulaahi calayhim.

Salaamulaahi calaykum waraxmatuhu wabarakaatuhu
Abuu Khuzayma Jamaal